.BFA REPUBLIK ÖSTERREICH
BUNDESAMT FÜR FREMDENWESEN UND ASYL

MACLUUMAAD GUUD
oo ku saabsan habraaca magangelyo

Waad gudbisay dalabkaaga magangelyo waxaanu hadda yaalaa

maamulka habraaca

Kaasoo wax lagaaga weydiin doono safarkaaga iyo macluumaad kale oo loo baahan yahay.

Muuqaalka Habraaca

1.) Waxaad ugu sameysay dalab magangelyo Austria bilayska, adeegga namadgelyo ama xarun qaa bilaad oo bilow ah.

2.) Dalabkaaga magangelyo wuxuu soconayaa uun marka lagu sameeyo shakhsi xarunta qaabilaadda bilowga. Waxaana laguu qaadi karaa waliba xarunta qaabilaaddda bilowga.

Markaas uun buu habraaca magangelyadu bilaab. Haddii aan laguu qaadin xarunta qaabilaada bilowga ah, dalabka magangelyo ee la gudbiyey waxa loo qaadanayaa in u jiro wareysiga ka dib, baadhis iyo habab qeexid ayaa la sameynayaa. Haddii aad tahay qof ka yar 14 jir oo aanad garanayn halka waalidkaagu joogo, dalabka markaa waxa kaliya la gudbin marka la xaqiijiyo joogitaanka la-taliyayaasha sharci xarunta qaabilista ee hore. Fadlan diyaari**dokomantiga aad la timid oo dhan**– dharkaaga iyo shandadahaagaba waxa laga yabaa in la baadho oo ay baadhaan shaqaale kula jinsi. Si loo xaqiijiyo cidda aad tahay iyo in la hubiyo in ay Austria dhab haantii ka masuul tahay dalabkaaga magangelyo, **faraha** ayaa lagaa qaadayaa. Waxa lagu siinayaa kaadh habraaca oo cagaaran 3 maalmood gudahood, ilaa hab-socodkaaga la oggolaaday kahor soosaarista kaadhkan, waxaad heli doontaa kaadhka xaq u yeelashada degganaanshaha iyada oo la raacayo § 51 ee Asylgesetz 2005 (AsylG 2005 – Xeerka Magangalyo-doonka 2005) (kaadhka cad).

3.) hadda waad sameysay dalabkaaga magangelyo, waxa ku wareysan doona bilayska waxaanay ka wareysan doonaan jinsiyadaada iyo safarkaaga.

4.) iyadoo ka ah qayb ogolaashaha habraaca – illaa dalabkaaga mar hore la ogolaaday mooyee – waxa lagu wareysan doonaa ugu yaraan halmar waxaana ku wareysanaya qofka ka go'aan gaadhaya dalabkaaga magangelyo. Waxa laga yaabaa in u kula socdo qayb sedexaad oo lagu kalsoon yahay iyo wakiil qof uga maamulka wareysiga. Marka laga hadlayo wareysiyo magangelyo doon oo da'doodu ka hooseyso18, wakil sharci waa in u goob jog ahaadaa.

5.) Ogolaashaha habraacu waxa laga yaabaa in u ku dhamaado sida soo socota:

Haddii u habraacu hadda taariikhda la joogo tuso in ay u dhowdahay in aad ka heli doonto ilaalin xidhitaan dalka kale (dal sedexaad oo badbaada roon) amain dal kale u masuul ka yahay hubinta dalabkaaga oo sidaas awgeed la damacsan yahay in laga **diido** dalabkaaga magan gelyo Austria, ama laga **ogolaan waayo sababo kale**, waxa lagu sheegi doonaa ka hor waxana laguu yeeli doonaa la taliye sharci. Ka dambe kaalintiisu waa in u la taliyo oo isaga/iyada way joogayaan wareysiyada dambe. Waxa lagu siin doonaa go'aan sida ugu dhaqso badan.

Wareysigan ka dib,go'aanka laga qaadanayo habraaca waxa laga yaabaa in u qaato mid qaababkan ka mid:

- laguuma ogla in aad gesho habraaca magangelyo: waxaad heli doontaa ogeysiin diidmo ama mid ogolaasho la'aan ah.
- Waa laguu ogolaaday in aad gasho habraaca magangelyo: tani waxay ka dhigan tahay waxaad heli dootaaogolaasho deganaasho oo waxa laguu diri doonaa xarun qaabilaad–laga yaabaa gobolka ka mid ah federaalka Austria. Go'aanka ku saabsan dalabkaaga magangelyo waxa lagu gaadhay wakhti dambe laamahagobol Xafiiska Fedaraalka.

Waxa la filayaa in dalabkaaga magangelyo in aan la diidayn, caadi ahaan waa laguu **ogolaan** doonaa in aad gesho habraaca magangelyada; tani waxay ka dhigan tahay in go'aan laga gaadhi doono waxa ku jira dalabkaaga (sababaha baxsiga). Tani ka joojin mayso go'aan ku saabsan waxa laga qabtay ogolaashaha habraca. Waxaad heli doontaa**ogolaasho degsiimo**mar haddii laguu ogolaaday in aad gasho magangelyada oo tani waxay wax ka taraysaa cadaynta sharcinimada joogitaankaaga Austria. Dabadeedna intaa wax soo raacaya, waxa laga yaabaa inlaguu diro xarun qaabilad – laga yabaa in u yahay gobol kale oo federaalka ah. Go'aanka dalabkaaga magangelyo mar dambe ayuu soo gaadhay laamaha gobolka ee Xafiiska Fedaraalka.

Haddii aad doonayso in aad ku noqoto **dalkaaga**, waxa laga yaabaa in aad hesho la talin sidaad u ugu guryo noqon lahayd wakhti kasta iyo heer kasta oo u habku marayo. Marka aad hesho macluumaadka in dalabkaaga magangalyo-doonka ay u dhawdahay in la diido ama haddii Xafiiska Fadaraalku soosaaro go'aan celin, waxa waajib kugu ah inaad ka faa'idaysato adeegga la-talinta dib-u-celinta.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH oo Muhiim ah:

- haddii aad gudbisay **dalab dambe** (sida. Dalab dheeraad ah oo la socda dalab mar hore go'aan sharci laga gaadhay), qodobo gaar ah ayaa qabanaya oo la isticmaali karaa. Waraaqo gaar ah ayaa macluumaad ka bixinaya tan.

- Waxa jira ka la taliyayaal sharci oo madax banaan xarunta qaabilaadda bilowga ah si ay kuula taliyaa muddada habraaca magangelyada. Waxa laga yabaa in aad la xidhiidho haddii aad u baahato. Waad kari kartaa, arrintu si kastaba ha ahaatee, in aad hawl geliso la taliyaha sharci (qareen).
  La taliyaha sharci waa qof aad ugu dhuun daloola hawlaha dadka shisheeyaha ah iyo magangelyada. La taliyayaashani si aan dhinac raacsanayn oo madax banaan ayey kaaga wakiil ahaanayaan waxaanay kaala talinayaan arrimaha sharciga. Intaa waxa dheer, la taliyayaasha sharci waxa saran xilka iyo hawlaha sirta ama qarsoodiga ah.

- Sababo dhowr ah awgood, waxa laga yaabaa in lagu qaado xabsi si loo hubiyo hab-socodka mastaafurintaada.
  Haddii aad is ogaato in aad xidhan tahay, shaqaale ka mid ah Xafiiska Fedaraalka ayaa kula xidhiidhi doona oo kugu wareysan doona meesha aad ku xidhan tahay ama xarunta qaabilaadda bilowga ah. Waxana waliba laga yaabaa in aad hesho la taliye sharci.

- Haddii aad ka yartahay 18 sani jir oo aanad garanayn meesha ay waalidiintaadu joogaa wakhtigaa, fadlan noo sheeg markiiba. Marka waxa wakiil kaa ahaanaya la taliye sharci muddada habka oo dhan ilaa lagu diro xarun qaabilaad. Gaar ahaan, la taliyaha sharcigu goob joog buu ka ahaanayaa wareysiyada oo dhan.

- Haddii ay ku hayan dhibaatooyin caafimaad ama nafsaani ah, fadlan ha ogaado dhakhtarku iyo la taliye sharci markiiba.

- Please Fadlan markiiba noo sheeg haddii aad ka baqayso xadhig dalkaaga ah oo ah weeraro sababo rabitaan galmo (sida gabood fal galmo). Dabadeedna waxa ku wareysan doona xubin ka mid ah shaqaalaha oo adiga kula jinsi ah --adoo wax kale codsada mooyaane.

- Haddii aad doonayso in aad ku noqoto dalkaagii si badbaada leh oo ay sharafi ku jirto, Waxaad ka faa'iidaysan karaysaa talada guryo noqoshada wakhti kasta iyo heer kasta oo habraaca ah. Talada guryo noqoshada waxa ka mid ah cadaynta rajooyinka Austria iyo

dalka aad ka soo jeedo. Hadii aad qaadato waxa laguu soo ban dhigay, waxa aad waliban heli kartaa kaalmo lacageed.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan ururada kaalmada bixiya marka la gurya noqonayo, la hadal la taliye sharci (xarunta qaabilaadda bilowga) ama mid ka mid ah shaqaalahayaga.

- Hay'adda Qaxootiga ee Jamciyadda Qaruumaha ka Dhexaysa(UNHCR):
  Waxaad la xidhiidhi kartaa u Qaybsanaha Arrimaha Qaxootiga wakhti kasta Sanduuqa Boosta 550, 1400 Vienna, Telifoon. Lambar: 01/26060/4968 (waaxda sharciga); Fax: 01/2634115;E-mail:ausvi@unhcr.ch; Internet: www.unhcr.at.
  Si kastabaha ahaatee, fadlan,UNHCRma imanayoso Austria si ay talo u bixiso.

- **Xidhiidhada suurtagalka ah**
  www.rechtsanwaelte.at Tuchlauben 12, A-1010 Vienna,Tel: +43 (1) 535 175

- Haddii aad wali su'aalo hayso, shaqaalahayagu way ku faraxsan yihiin in ay ku kaalmeeyaan.